



Sheekaysi, Ciyaar, Wax akhris

Waxqabadyo xiiso leh oo fudud si nuunuuga/cunuga
yar iyo carruurta yaryar looga taageero horumarka
wadda xidhiidhka iyo luqadda

[Iyadoo lala kaashanaayo](#)

National
Literacy
Trust

Change your story

Better
Health

Start
for Life

Sheekaysi, ciyaar, wax akhris

Saddex siyaabood oo fudud oo aad ilmahaaga ku siin karto bilowga ugu wanaagsan ee nolosha



Haddii aad xiiseynayso waxqabadyada buug-yarahan ku yaala, ayaad warsidahayaga jeclaan doontaa! Waxa uu kaasi iman doonaa labadii toddobaadba mar iyadoo uu la socdo waxqabadii ugu dambeeyay iyo waxqabadyada wax akhriska, wararkii u dambeeyay iyo wax kale oo badan!

Boggayaga internetka iska diiwaangali:
wordforlife.org.uk/newsletter



Waxqabadyo fudud, madadaalo leh oo carruurta loogu talagalay

Waxyaabo yaryar oo badan ayaa maskaxda carruurta ifiya

Carruurta wax walba way qaataan. Xitaa waxyaalaha ugu yar ee aad la samayso ayaa wax weyn ka beddeli kara inay ugu diyaar garoobaan maalinta ay dugsiga bilaabi doonaan.



Sida aad ilmahaaga u taqaano ayaanay cida kale u aqoonin. Dooro oo xullo fikradaha adiga kugu habboon, wax ka beddel waxqabadyadaya ama adigu kuwaaga la kaalay.



Waxaanu ognahay inaad khabiirka ilmahaaga ku tahay. Waxqabadyadan qaarkood ayaa daqiiqado qaadan kara, halka kuwa kalena ay waqti dheer qaadan karaan. Waxaan rabnaa inaad adiga iyo ilmahaaga waxqabadyadan ku raaxaysataan markaas fadlan ha u dareemin inay cadaadis ku saareyso saacadu. Waxaad ku soo noqon kartaa marka aad doonto. Raac tilmaamaha hagitaanka ee ilmahaaga



Isticmaal **#ChatPlayRead** si aad sawirrada iyo fiidyaha ula wadaagto yaryarkaaga inay waxqabadyada buug-yarahan samayaan. Waxqabad kastaa waxa uu sidoo kale leeyahay fiidyow markaas ayaad iskaangareyn kartaa koodka QR wixii macluumaad dheeraad ah. Waxaanu jeclaan laheyn inaan aragno sida ay waddanka oo dhan qoysasku u isticmaalaan fikradahayaga!

Hordhac

Waxqabadyada wada sheekaysiga	5
Beddelaada xafaayadda iyo wada sheekaysiga	6
Maalinta soo socota	8
Kaxee, kaxee, kaxee doonta	9
Ciyaarta xusuusta	11
Waxqabadyada ciyaarta	13
Peek-a-boo	14
Baashaalka xilliga qubeyska	15
Samee sanduuqa codkaaga ee gaarka	16
Zoom, zoom, zoom dayaxa ayaanu aadeynaa	18
Waxqabadyada wax akhriska	20
Wakhtiga buuga ee raaxada leh	21
Soo wada dukaamaysiga	23
Maalintii uu Teddy dibada u baxaayo	24
Twinkle twinkle little star	26

Waxqabadyada wada sheekaysiga

Maalinta soo socota



Ciyaarta xusuusta



Kaxee, kaxee, kaxee doonta



Beddelaada xafaayadda iyo wada sheekaysiga



Beddelaada xafaayadda iyo wada sheekaysiga



In la wadahadlo xilliga beddelaada xafaayadda ayaa ilmahaaga ka caawisa inuu wada sheekaysiga barto.



Ilmahaagu wuu jeclaan doonaa markaad la hadasho. Markaad la sheekaysato ee aad weji kolba si ka dhigto, ayaaad xidhiidh abuuraysaa iyadoo aad ka caawinayso inay dadka wax ka bartaan.



Waxa wanaagsan in la ogaado

In ilmahaaga aad la sheekaysto maalinta koowaadba ayaa siinaysaa agabka ay u baahan yihiin si ay ugu bartaan hadalka iyo fahamka dadka kale.

Talooyinka ugu fiican ee wakhtiga xafaayada



Ahow qof dhoola cadeynaaya



Samee dareenada wejiga iyo dhawaaqyo kala duwan.



Waxa uu ilmahaagu jecel yahay inuu ku daawado oo kugu daydo. Isku day inaad carabkaaga soo saarto!



Ka jawaab celi dhawaaqyada iyo dareenada wejiga ee ilmahaagu sameynaayo.



Isdeji si uu ilmahaagu u nasto oo uu diirada kuugu saaro.



Isku day inaad ilmahaaga ugu heesto mid ka mid ah heesahaaga xaddaanada ee aad ugu jeceshahay.

Maalinta soo socota



Inaad ka hadasho waxa aad samayn doonto maalintaas ayaa ilmaha inuu barto ka caawisa.



Waxay carruurta jecel yihiin wax caadaysiga iyo inay ogaadaan waxa soo socda.

Xilliga subaxdii, ilmahaaga kala hadal waxa uu qorshahaagu yahay. Waxaad kaas la hadli kartaa markaad quudinayso, u beddelayso, safrayso ama ciyaareyso.

Waxay firkad wanaagsani tahay kala hadalka sida aad wax u kala horqabanayso.

Tusaale ahaan: "Marka hore waynu lebbisan doonaa, ka dibna waxaynu cuni doonaa quraac."

Marka ilmahaagu sii weynaado oo uu barto inuu hadlo, wayaad waydiin kartaa inay garanayaan waxa xigi doona. Waxa laga yaabaa inay wakhti ku qaadato inay bartaan, laakiin kaliya inaad weydiinta ayaa ka caawisa inay ahmiyad siiyaan.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Wax joogteysiga yo ogaanshaha waxa dhici doona kadib ayaa dhamaantood ka caawinaya in ammaan la dareemo oo la awoodo in wax la barto.

Kaxee, kaxee, kaxee doonta

Heestan xanaanadu waxay leedahay ficilo qosqosol ah iyo dhawaaqyo si uu ilmahaagu ugu qoslo.




Waxaad carruurta sii yaryar ka caawin kartaa dhaqdhaqaaqyo fudud sida inaad dhabtaada saarto oo aad heesto. Maadaama oo uu ilmahaagu si xasiloon u fadhiisan karo, ayay awoodi karaan inay si madax-bannaan u sameeyaan dhaqdhaqaaqyo iyo ficillo badan. Kaliya hubi uun inaanay meel adag ku dhacaynin!

La fadhiiso ilmahaaga isagoo ku soo eegaaya oo gacmaha qabo. Si tartiib ah ugu dhaqdhaqaaqi gacmahooda gadaal iyo hore marka aad 'row- dhahayso'. Ku raaxayso dhawaaqa, qaylada ama cidda markaad aragto jiirka, yaxaaska ama libaaxa.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Waxa ay heestani ilmahaaga ka caawisaa awooda dhaqdhaqaaqa maadaama oo ay jidhkooda oo dhan isticmaalayaan si ay ugu ruxayaan. Waxay tani ka caawin kartaa isku dheeli tirkooda iyo korriinka muruqayada.



Kaxee, kaxee, kaxee doonta,
Si tartiib ah durdurka ugu dhaadhac
Raynrayn, raynrayn, raynrayn, raynrayn
Noloshu waa riyo uun.

Kaxee, kaxee, kaxee doonta
Si tartiib ah laagta kor ugu fuul.
Haddi aad Jiir yar aragto
Ha iloobin in aad jiigleyso!

Kaxee, kaxee, kaxee doonta
Si tartiib ah wabiga ugu dhaadhac.
Haddi aad buti aragto
Ha iloobin in aad gariirto!

Kaxee, kaxee, kaxee doonta Si
tartiib ah mawjada ugu dhaadhac.
Haddi aad yaxaas aragto
Ha iloobin in aad qayliso!

Kaxee, kaxee, kaxee doonta
Si tartiib ah xeebta u gee.
Haddi aad libaax aragto
Ha iloobin in aad cido!

Kaxee, kaxee, kaxee doonta
Si tartiib ah mawjada ugu dhaadhac.
Raynrayn, raynrayn, raynrayn, raynrayn
Noloshu waa riyo uun.



Waxa wanaagsan in la ogaado

In ilmahaaga lala heeso heesaha xanaanada waxay ku caawisaa inay bartaan hadalka yaqaanaan erayada iyo laxanka. Waxa laga yaabaa inay bilaabaan inay ku daydaan dhawaaqyada aad samayso, ama ereyo ku soo biiriyaan.

Ciyaarta xusuusta



Tani waa ciyaar ay sahlan tahay in guriga lagu ciyaaro.

Waxay ilmahaaga ku dhiirigelisaa inuu hadlo, fikiro oo uu ciyaaro.



Ciyaartan xusuusta ee xiisaha leh waxay ilmahaaga ka caawin doontaa inay xidhiidh sameeyaan oo ay dhibaatooyinka xaliyaan. Nuunuyada ayaa laga yaabaa inay ka doodaan alcaabta kala duwan oo ay bilaabaan inay kala saaraan. Carruurta waaweyni waxay xiisayn doonaan inay isku dayaan inay xusuustaan waxa maqan.



Waxa wanaagsan in la ogaado


Waxay ciyaartaani ka caawisaa inay dhisaan luqadda, feejignaanta iyo xusuusta.

1




Soo ururi qaar ka mid ah waxyaabaha uu ilmahaagu jecel yahay, buugaagta iyo walxaha/alaabta. Ayaga ayaa kuwaas kaa caawin kara.

2




Isku wada dar oo ka hadal waxa halkaas yaala.

3



Ilmahaaga weydii inay indhahooda isku qabtaan oo ay is wareejiyaan.

4



Mid alaabta ka mid ah ka saar. Ka dibna u ogolow inay indhaha kala qaadaan oo bal fiiri haddii ay xasuusan karaan waxa maqan.



Hadda waa markaagii

Waxaad ciyaartaan u ciyaari kartaa si kale, iyadoo ilmahaagu shay ka saaraayo oo uu xusuustaada eegaayo.

Waxqabadyada ciyaarta

Madadaalada
waqtiga qubeyska



Samee sanduuqa
codkaaga ee gaarka



Zoom, zoom, zoom dayaxa
ayaanu aadeynaa



Peek-a-boo

Peek-a-boo



Peek-a-boo waxa weeye ciyaar xiiso leh oo ay carruurta yaryar ku raaxaysan karaan!



Tani waa ciyaar aad u fiican in la ciyaaro marka uu ilmahaagu faraxsan yahay ee uu nasanaayo. Waxaad ciyaartaan la ciyaari kartaa nuunuugaaga dhabta ku fadhiya ama marka uu ilmahaagu jiifo ee uu indhaha kugu hayo. Ciyaar ciyaartan adigoo wajigaaga gacmahaaga ama buste ku daboolaya. Ilmahaaga waydii "Xagee aayaa hooyo/aabe/magacaagu tagay?". Kadibna wajigaaga soo saaro oo dheh "Peek-a-boo!"



Waxa wanaagsan in la ogaado

Waxa ay wakhtiga calsshu ilmahaaga ka caawisaa inay muruqyada calooshaadu xoogeystaan taas oo ka caawin doonta inay fadhiistaan, gurguurtaan oo ay socdaan. Haddii ilmahaagu wakhtiga caloosha aanu jeclayn, ayaa ciyaar taas oo kale ah ay ka caawin karta inay la madadaaliyo.

Madadaalada waqtiga qubeyska



Wakhtiga qubeyska ayaa ah wakhti wanaagsan oo ku haboon in la sheekeysto oo la ciyaaro maxaa yeelay ilmahaagu badanaa wuu nastay oo waxaad haysataa ahmiyadooda.



Koobi garee ficilada ilmahaaga ama dhawaaqyada ay sameeyaan oo fiiri sida ay uga jawaab celiyaan.

Ka hadal waxa aad samaynayso intaad samaynayso. Tusaale ahaan, marka ay gaadho wakhtiga wajigooda la dhaqaayay, waxaad tidhaahdaa, "Waqtigii wejiga la dhaqi lahaa".

Haddii ay ku qubaystaan alcaab, ayaad falka ciyaarta ku samayn kartaa. Tusaale ahaan, "Waa wakhtigii la dhaqi lahaa wejiga boolada/shimbirta ceelal joogta!"

Waxaad sidoo kale qanjili kartaa ficilka. Fiiri haddii ilmahaagu ku koobigareeyo ama uu dhawaaq sameeyo.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Marba marka ay ka sii badan tahay inta aad wakhti wada qaadataan ayay ka sii badan karraa waxa uu ilmahaagu baran doono.


Samee sanduuqa codkaaga ee gaarka

Waxaa jira siyaabo badan oo la iskula falgali karo ciyaaro ama sawirada ahaan. Mid ka mid ah siyaabahaas ayaa ah iyadoo codad la samaynaayo.




Waxa wanaagsan in la ogaado


Ciyaaraha codadka wata ayaa ilmahaaga ka caawiya inuu si fiican u wax u dhegeysto, taas oo faa'iido u leh marka ay diyaar u noqdaan inay wada hadlaan.

1


Isku keen alaabo la yaqaano. Waxay kuwaani noqon karaan alcaab ama sawiro ama walxo uu ilmahaagu jecel yahay. Waxay kuwani geli doonaan 'sanduuqa codka'.

2

Ta xigta, walxaha sanduuq ku rid (ama marada barkinta ayaa sidoo kale u la isticmaali karaa!).

3

La fadhiiso ilmahaag yar oo samee codka wax ka mid ah waxyaalaha sanduuqa ku jira. Tusaale ahaan, sacu waxa uu dhahaa "moo" ama gaarigu waxa uu dhahaa "vroom". Waydii ilmahaaga inuu helo alcaabta codkaa sameysay.

4

Ku dhiiri geli inay sanduuqa wada baadhaan si ay waxa saxda ah ugu helaan. Markay helaan ammaan oo sheeg waxa ay walaxdu tahay. Tusaale ahaan, 'Wax fiican ayaad sameysay, waxaad heshay sacii!'

Zoom, zoom, zoom dayaxa ayaanu aadeynaa



Heestan xanaanadu waxay leedahay
ficilo qosqosol ah iyo dhawaaqyo si uu
ilmahaagu ugu qoslo.




Fadhiiso adiga oo ilmahaaga gacmaha ku haya oo si tartiib ah ugu rux gadaal iyo horay. Cirka tilmaam oo goobo ku samee gacmahaaga markaad cirka ku sii socoto. Markaad hoos u tirinayso, codka sii kordhi lambar kasta ka dib. Markaad adiga iyo ilmahaagu gaadhaan "qarax", hawada sare ugu qaad.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Waxa ay heestani ilmahaaga ka caawisaa awoodooda dhaqdhaqaaqa maadaama oo ay gacmahooda isticmaalayaan si ay goobada ugu sameeyaan. Waxay tani ka caawin kartaa isku dheeli tirkooda iyo korriinka muruqayada.



**Soo jeesta dhamaan cirbixiyiintow
Fadlan warbixintaada u soo gudbi markabka gantaallada
isku diyaari inuu qarxo oo kor loo gano
Mahadsanid!
Zoom Zoom Zoom
Dayaxa ayaynu aadeynaa
Zoom Zoom Zoom
Dayaxa ayaynu aadeynaa
Haddi aad rabto inaad safar gasho
Soo fuul markabkayga gantaalka ah
Zoom Zoom Zoom
Dayaxa ayaynu aadeynaa
10 9 8 7 6 5 4 3 2 1**

Waxaanu qarax ugu gamanay/duulnay kor!

Markaad gaadhaan "qarax",
hawada sare ugu qaad ilmahaaga.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Waxaad maktabadda xaafaddaada ka heli kartaa buugaag heeso xanaanada ah. Mararka qaar ayay maktabaduhu qabtaan waqtiyo lagu qaadayo heesaha xanaanada.

Waxqabadyada wax akhriska

Wakhtiga buuga ee raaxada leh



If if
xiddig yahay yari



Soo wada
Dukaamaysiga



Maalintii uu Teddy dibada u baxaayo

Wakhtiga buuga ee raaxada leh



Waxay carruurta jecel yihiin daawashada sawirada iyo maqalka sheekooyinka buugta.



In maalin walba wakhti loo helo eegitaanka buugta ayaa horumarka ilmahaaga u wanaagsan. Waxay ka caawisaa inay ahmiyada wax saaraan oo ay erayo bartaan. Waxa sidoo kale tahay fursad wakhti degan oo wakhti raaxo leh la wada qaato.

Dhis guri raaxo leh adigoo buste miis ka saaraaya oo barkimooyin hoos ka gelinaaya. Waxaad xitaa guriga ka dhisi kartaa meel bannaanka ah. In buug la wadaago iyadoo la joogo meel aan laga filaynin ayaa ah wax xiiso leh iyadoo carruurta ay bilaabi doonaan inay buugaagtu inay yihiin wax tacabur ah ugu fikiraan.

Si loogu abuuro jaceyl buugta loo qabo, ayaad waxyaalaha uu ilmahaagu joogtada u qabto ka sameyn kartaa xilliga sheekooyinka Buugaagta ayaa wax wanaagsan noqon karta wax yar ka hor wakhtiga hurdada. In buug la wada fiiriyo iyado oo la wada aamusay yahay ayadoo u sheegi doonta in wakhtigii is dejinta la gaadhay.

Ama waxay noqon kartaa maalinta badhtankeeda – mar kasta oo aad is leedahay waxay u baahan yihiin wakhti degan.



Waxa wanaagsan in la ogaado

In maktabadda la booqdo ayaa noqon karta mid adiga iyo ilmahaaga u noqon karta khibrad bulsho ahaaneed. Waxaad sidoo kale heli kartaa buugaag badan oo carruurta oo aad bilaash ku deynsan karto.

Talooyinka ugu fiican ee wakhtiga buuga

Buug fiiri wakhti kasta, ma aha inay noqdo wakhtiga hurdada uun

Hel meel degan

Ka hadal sawirada oo akhri qaar ka mid ah ereyada ama dhamaantood

Ilmahaaga sii wakhti uu kaga jawaabo

Ku soo celi erayada ilmahaaga

Wakhti badan ha akhriyin. Jooji marka uu ilmahaagu caajiso

Soo wada dukaamaysiga



Safarkaaga dukaameysiga ayaa noqon kara fursad aad kula sheekeysato ilmahaaga oo aad ku tusto in xarfaha iyo ereyadu ay inagu wareegsan yihiin.



Ilmahaaga kala hadal waxaad arki karto markaad dukaamada dhex wareegayso. Sharaxaad ka bixi alaabta aad soo qaadayso oo ilmahaaga ku dhiirigeli inuu sidaas oo kale sameeyo. Tilmaan boodhadhka dukaanka, sumadaha iyo calaamadaha. Waxay tani ilmahaaga ka caawinaysaa inuu fahmo in xarfaha iyo erayadu ay ujeedo leeyihiin.




Waxa wanaagsan in la ogaado

Waxa laga yaabaa inuu ilmahaagu rabo inuu sameeyo liiska wax iibsiga, gaar ahaan haddii ay mid kugu arkaan. Ku dhiiri geli inay shay kasta calaamad ama sawir ka dhigaan. Waxa laga yaabaa inay marka hore ay sawiraan xariijimo ama wax qaab leh.

Maalintii uu Teddy dibada u baxaayo



Wakhti sheekada ee caruusada ilmahaaga ugu jecel yahay.



Waxqabadka sheekadu buugaag kuma lug laha. Waxay ilmahaaga ku dhiirigelinaysaa inuu isagu sheekadiisa sameeyo. Dooro mid ka mid ah alaabta ay jecel yihiin, sida madax-kuti/dubduub ama caruusada. Ka dhig qofka sheekada ugu muhiimsan. Haddii aad heli kari laada'ay fikrad sheeko, isku day inaad ka sameeyso safar tareen.



Waxa wanaagsan in la ogaado

In sheekooyin la sameeyo waxay caawisaa kobcinta hal abuurka iyo khiyaaliga ee carruurta.

- 1** Ka bilow magaca toyga iyo meesha uu degan yahay.
- 2** Kadibna sii wad adigoo buuxinaaya meelaha banaan:

Waxaan ahay...

Waxaan ku noolahay...

Waxaan la safrayaa...

Saaxiibkayga ugu fiican waa...

Waxa uu tareenkaygu i geynayaa...

Intii sii soconay ayaanu jidka ku aragnay...

Samee codsiyadaada kolba markaad sii socoto. Wax micno ah ma laha sida ay sheekadu maalaa yacni u tahay. In sheeko la sameeyo ayaa madadaalo badan iyadoo ilmahaaga ka caawisa inuu hadalka barto oo uu khiyaaligiisa isticmaalo.

If if xiddig yahay yari

Waxaad heli kartaa heesaha xanaanadaa oo kala duwan oo buugaag muusiga ah. Muusiga iyo heesaha ayaa ah hab fiican oo marka uu yar yahay ilmahaaga loogu baro luqadda.



La fadhiiso ilmahaaga isagoo kugu soo jeeda oo tus sida uu gacmahiisa u dhaqdhaqaaqo si ay ugu nuuraan sida xiddigga oo kale. Ilmahaaga u qaad heesaha xanaanada oo farahaaga ku samee qaabka dheemanta.



Waxa wanaagsan in la ogaado

Muusigu waxa uu kaa caawin karaa kor u qaadisa xusuusta iyo xirfadaha wax ahmiyad saarista.

Waxa uu sidoo kale hoos u dhigaa istareeska isagoo dejina kara ilme xanaaqsan.



If if xiddig yahay yari
Maxaan is weydiinayaa waxaad tahay
Dunida aad uga sarreyso
Sida dheeman cirka ku taala
If if xiddig yahay yari
Maxaan is weydiinayaa waxaad tahay



Waxa wanaagsan in la ogaado

In ilmahaaga lala heeso heesaha xanaanadu waxay ka taageertaa xirfadaha luqadda, wax-akhrinta ka hor iyo wax qorista kahor markay bartaan inay maqlaan dhawaaqyo iyo erayo kala duwan oo ku jira heesaha.

Waxaad ka heli kartaa fikrado badan oo waxqabadyo madadaalo leh oo aad ku dari karto waxyaalaha kuu caadada ah:

[wordsforlife.org.uk](https://www.wordsforlife.org.uk)

[nhs.uk/start-for-life/early-learning-development](https://www.nhs.uk/start-for-life/early-learning-development)

Waxyaalo ku saabsan Hay'adda Wax-qorista Qaranka

Hay'adda Wax-qorista Qaranka waxa weeye hay'ad samafal oo madax-banaan oo awooda xirfadaha wax qorista iyo wax akhris ee ay u baahan yihiin siisa carruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn si ay horumar ugu sameeyaan.

Wax akhriska iyo wax qorista ayaa wax walba isbedel ku sameeya. Waxa ay ku siinaysaa agabka aad nolashaada uga faa'iidayaan lahayd, iyo awoodda aad mustaqbalkaaga ku qaabayn laheyd. Waxay kuu furaysaa albaabka nolasha aad rabto. Laakin wax akhris iyo wax qorista hooseysa ayaa la xidhiidhsan faqriga. 30-kii sano ee la soo dhaafay, waxaanu sii wadnay la shaqeynta dadka aadka noogu baahan, anagoo caawinayna dugsiyada, qoysaska iyo bulshada heer degmo iyo heer qaran ahaaneed.

f Naga hel Facebook [/nationalliteracytrust](https://www.facebook.com/nationalliteracytrust)

X Nagala socio X, formerly Twitter [@Literacy_Trust](https://twitter.com/Literacy_Trust)

@ Nagala socio Instagram [@Literacy_Trust](https://www.instagram.com/Literacy_Trust)

✉ Isku qor si aad u hesho warsidahayaga emailka ah ee bilaashka ah [literacytrust.org.uk/register](https://www.literacytrust.org.uk/register)

iyadoo lala kaashanaayo